# Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

**Qormadii 5aad**

**Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. ( e-mail: cabdicaqli@hotmail.com. ).**

Sheikh Madar wuxuu yimid Harar bilowgii 1840 kii, si uu aqoontiisa diineed u sii korodhsado. Barashada diinta Islaamka ee magaalada Harar lagu yaqaannay waxay iskugu dhafnayd barashada cilmiga shariicada iyo barashada cilmiga tasawufka. Culimada diinta ka dhigtaana waxay ugu muuqatay in barashada cilmiga shariicada iyo barashada cilmiga tasawufku yihiin laba aan kala maarmin oo wada dhammaystiraya aqoonta diinta Islaamka ee qofka wax baranaya. Waxayna rumaysnaayeen in barashada midkood keliyi ku keeni karto qofka waxbaranaya aqoon kala dhiman oo khatarteeda yeelan karta. Taasi oo ah in qofka cilmiga shariicada oo keliya bartaa, inkastoo aqoontiisa shariicada uu ka helay faaiido badan, hadana wuxuu halis u noqon karaa khataraha hawada naftiisa ee iscajabinta, magacjacaylka, istuska, iyo islaweynida ee ay aqoonta diineed ee uu korodhsaday ku abuuri karto naftiisa. Sidoo kale qofka tasawufka iska dhex gala tiiyoo aqoon qotodheer aaanu u lahayn cilmiga shariicada, ama aan haysan sheikh hagaya oo u kala sheegaya qaladka iyo saxa, wuxuu halis u yahay inuu ka xadgudbo xuduudaha shariicada Islaamka.

Waxay culimada Harar ku tilmaami jirtay in sida qofka nooliba uga wada koobanyahay ruux iyo jidh aanu midkoodna ka maarmi karin, uu sidaasi oo kale, Sheekha buuxaana ugu wada baahanyahay barashada cilmiga shariicada iyo cilmiga tasawufka. Sidaasi awgeed ayey ardayda diinta Islaamka ka baranaysa Harar, ee himiladoodu tahay inay noqdaan Sheekh buuxa, lagama maarmaan ugu ahayd inay labada cilmiba bartaan.

Sheikh Madar wuxuu yimid Harar isagoo aqoontiisa afka carabigu fiicantahay, diintana soo baranayey ilaa caruurnimadiisii. Taasi waxay u sahashay inuu markiiba la qabsado, kana qayb qaato duruusta ka socota magaalada. Waxaa kale oo caawiyay taageeradii dhaqaale ee uu aabihii u sii diyaariyay mudada uu wax baranayo. Sida muuqata waxay ardayda diinta ka baranaysa magaalada Harar u baahnaayeen inay haystaan dhaqaalihii ay ku noolaan lahaayeen mudada ay wax baranayaan, kharashka waxbarashadooda iyo ka buugagga ay wax ka baranayaanba.

Waxaa aad u qaali ahaa buugagga wax laga baranayo, waayo waxay ahaayeen kutub xaashiyahooda laga samaynayay saan aad looga shaqeeyay, lagana dhigay kuwo midabkoodu cadaan yahay si wax loogu qori karo. Ka dibna qof fartiisu aad u fiicantahay ayaa soo maanguurin jiray kolba kitaabka laga dalbado ee loo baahanyahay. Xilligii uu Sheikh Madar wax ka baranayey Harar, may lahayn magaaladu madbacad kutubta loogu daabaco. Taasi ayaa sabab u ahayd in kutubtu noqoto qaar qiimahoodu aad u qaali yahay. Hase ahaatee waxay magaalada Harar xilligaasi caan ku ahayd tayada fiican ee kutubta lagu sameeyaa leedahay. Kitaab ka mid ah kutubtii Sheikh Madar wax ka baran jiray

magaciisana la yidhaahdo " Fatx –al- Jawaad", oo uu gacantiisa ku soo maanguuriyay, haatanna yaalla magaalada Hargeisa wuxuu weli yahay mid sidii loo sameeyay aanay wax badani iska bedelin, oo warqadiisa iyo khadkii lagu qorayba la moodo in dhawaan la qoray, inkastoo muddo ka badan boqol iyo konton sano ka soo wareegtay markii la sameeyay lana soo maanguuriyay.

Habkii uu Sheikh Madar wax u bartay iyo maadooyinkii uu dhigan jiray waxaa inoo iftiimin kara habka magaaladaasi wax loogu baran jiray iyo kutubta uu qoray ee la hayo. Waxbarashada diinta ee magaaladaasi waxay u qaybsanayd laba marxaladood. Marxaladda hore waxaa la baran jiray cilmiga Shariicada, marxaladda labaadna cilmiga tasawufka. Sida muuqata wuxuu Sheikh Madar bilaabay marxaladaasi hore ee lagu baranayo cilmiga Shariicadda isagoo yar oo markaasi uun qaan gaadhay. Aqoonta cilmiga shariicadda waxaa lagu baran jiray masaajidyada. Marka uu ardaygu helo macalin qaybta uu doonayo dhigaya, bilaabanayana dersiga uu doonayo ayay u suurto geli jirtay inuu dersigaasi barto. Macallinkuna kolba kitaab ayuu u bilaabi jiray ardayda ilaa ay barashada kitaabkaasi dhammaanayso, oo ardaydu wada baranayso nuxurka kitaabkaasi oo idil.

Waxaa ardayda ku waajib ahaa in ugu horreyn ay aad u bartaan afka carabiga ka hor intaanay diinta barashadeeda guda gelin, tiiyoo luqadda iyo naxwaha afka carabiga la barayo. Waxaa ku xigi jiray in barashada diinta Islaamka looga soo bilaabi meel hoose tiiyoo laga bari jiray kutub fudud.Tusaale ahaan, waxaa la bari jiray hawlaha lagama maarmaanka u ah salaadda tiiyoo lagu bilaabi jiray barashada kitaabka Safiinat al salaah. Kadibna tartiitiib tartiib ayaa kolba kitaabka xiga loo gudbin jiray, iyagoo baranaya cibaadaadka, mucaamalaadka, nikaaxa iwm.Markaasi kadib ayaa loo gudbin jiray barashada axkaamta, oo kolba heer loo sii gudo geli jiray.  Waxaa taasi garab socon jiray kobcinta aqoontooda afka carabiga iyagoo baranaya naxwaha, sarfiga, iyo balaaqada afkaba. Marka aqoonta diineed ee ardaygu kobocdo ayaa loogu sii dari jiray barashada cilm –al- mandaq. Barashada tafsiirka Quraankuna waxay ahaan jirtay marxaladda ugu danbaysa kadib marka uu ardaygu gaadho heer sare oo uu si fiican u fahmi karo micnaha dhabta ah ee aayadaha quraanka.

Sheikh Madar marxaladahaasi oo idil ayuu soo maray mudadii uu Harar diinta ka baranayey. Waxaana inoo muuqan kara in fahamkiisa iyo maskaxdiisuba ahaayeen kuwo aad u fiican, marka aynu eegno sida uu xilayadii danbe wax ula dhigan jiray ee uu u soo gaadhay arday ka da' weyn, sannado badanna uga soo horreyay Harar.  Waxayna taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo soo tebisay in aqoontiisa afka carabigu ay aad u sarreysay, taasoo marka uu tafsiirka Quraanka sharraxayo uu ku dari jiray icraabta erayada quraanka oo idil. Sidoo kale kitaab uu Sheikh Madar qoray laguna magacaabo " Macaadin al Culuum" ayaa muujinaya heerka fikirkiisu gaadhsiisnaa iyo in aqoontiisa diinta iyo afka carabiguba ay ahaayeen kuwo heer sare gaadhsiisnaa. Qormooyinka danbe ayeynu sii gudo geli kutubta iyo qoraalada Sheikh Madar.

Marxaladani lagu baranayo aqoonta cilmiga shariicadda waxaa lagu dhigi jiray masaajika dhexdiisa. Sababta ugu weyn ee arrinkaasi looga jeedayna wuxuu ahaa in mudada ay ardaydu diinta baranayso, ay garab socoto cibaadada xiliyada salaadda oo idil lagu tukanayo jamaca masaajidka. Taasi laf ahaanteeda oo looga dan lahaa in ardaygu ku soo barbaaro, oo uu caadaysto in aanu marnaba seegin salaada jamaca ee masaajidka.

Sheikh Madar mudadii uu ku jiray barashada aqoonta shariicada, ayuu ka maarmay inuu mar walba aabihii u soo diro kharashka ku baxaya mudada uu wax baranayo. Wuxuu sannado ka dibba noqday gacan yare macalimiinta wax la dhiga. Waana mid la ogsoonyahay in hawlahaasi oo kale ay maanta jaamacado badani isticmaalaan habkaasi, tiiyoo ardayda barashada tacliinta aad ugu wanaagsan loo doorto inay wax dhigaan iyagoo weli ku dhex jira mudadii ay iyagu wax baranayeen.

Sidoo kale wuxuu Sheikh Madar aad ugu fiicnaa qoraalka farta wax lagu qorayo. Culimada fartoodu wanaagsantahayna waxaa loogu baahan jiray inay kutubta la akhrisanayo maanguuriyaan. Waxaana qoraalada Hargeisa yaalla inooga muuqan kara in Sheikh Madar uu ka mid ahaa dadka fartoodu aad u fiican tahay ee ku shaqaysta xirfadda maanguurinta qoraalada kutubta. Mid ka mid ah kutubtaasi ayaa inoo muujinaya in Sheikh Madar soo maanguuriyay laguna iibiyay lacag dhan 107 Ashraf oo ahayd lacagtii xilligaasi lagu isticmaali jiray magaalada Harar. Taasi waxay u suurto gelisay inuu Sheikh Madar ka maarmo Karashkii uu aabihii u soo diri jiray mudadii uu wax baranayey.

Isku filnaanshaasi, ayaa u horseeday inuu ku guursado Harar isagoo dhalinyaro ah. Wuxuu Harar ku guursaday gabadh ka mid ah reeraha soomaaliyeed ee xilligaasi deganaa Harar. Waxaana halkaasi ugu dhashay saddexdiisa wiil ee ugu weyna ee Abiibakar, Cumar, iyo Xasan. Kuwaasoo ku koray magaalada Harar, markii danbena Sheekha u soo raacay Hargeisa iyagoo rag waaeyn ah.

Sheikh Madar kuma ekaan in aqoontiisu ku koobnaanto ta shariicada oo keliya markii uu marxaladii hore dhammaystay, ee waxay ugu muuqatay inuu gaadho Sheikh weyn oo cilmiga tasawufkana yaqaanna. Sida wareysiyada dadka xog ogaalka u ah taariikh nololeedkii Sheikh Madar inoo tebiyeen, isaga ayaa ugu da' yaraa culimadii baranaysay cilmiga tasawufka. Waa arrin taariikhda Islaamka, ilaa iyo xiliyada tasawufka iyo shariicada gooni loo kala baran jiray aad ugu yar qof labada cilmiba kulmiyay oo labadaba wada dhammaystiray. Marxaladani waxaa lagu baran jiray guriga Sheekha dariiqadaasi hogaaminaya. Waxay dariiqada laga baran jiray Harar ahayd dariiqada Qaadiriyada ilaa iyo qarnigii 15aad markii uu caydaruus al cadani keenay dariiqadani magaalada Harar. Faahfaahinta marxaladani siduu Sheikh Madar u soo maray qormada danbe ayaa inoo sharaxi.

La soco salaasada danbe.